

12-15- jirada iskuuleyda ah talaalkoodii koronuhu Turku wuu ka bilaabmay

Magaaladda Turku daryeelkeeda caafimaadka ee iskuuladu waxay u fidinayaan dhammaan cidii dooneysa ee 12-15-jirada iskuuleyda ah talaalka koronaha todobaadyadan fooda inagu soo haya. Talaalada waxaa laga bixinayaa iskuulada iyo sidoo kale goobaha adeegyada khaaska ah loo gooni yeeleyba.

- Fasalada 6.aadka talaalada koronaha ee la siinayaa waxay iskuulada ka bilaabmayaan khamiista 12.8.2021
- Fasalada 7.-9.aadka talaalada koronaha ee la siinayaa waxay iskuulada ka bilaabanayaan isniinta 16.8.2021

Maalmaha talaalka oo sugan iyo sidoo kale- sida loogu dhaqmayaba gadaal ayaa looga soo warbixin doonaa iskuul walba si gaar ah marka la hubiyo maalmaha sugan ee talaalka laga bixinayo.

Kalkaalisada caafimaadka sare ee iskuulku waxay ku talaaleysaa 12-15- jirada talaalka- Moderna Spikevax nooca ah. Talaal qaadashadu waa mid qof walba u madax banaan yahay waana lacag la'aan. Waa muhiim in aad qaadashada talaalka gurigga kaga soo wada sheekeysataan.

Talaalka awgiis waxaa wanaagsan in waalidku ay soo buuxiyaan foomka ogolaanshaha. Haddii loo baahdo xataa ilmaha aan weli da'ada qaangaadhka gaadhin xataa iskii wuu go'aamin karaa talaal qaadashada, waa haddii talaal bixiyaha kalkaalisada caafimaadka sare ee xirfada lihi ay qiimeyso, in isaga da'adiisa iyo heerka kobociisaba sida ku saleysan uu awoodo go'aanka qaadashada talaalka. Haddii ardeyga dhallinyarta ihi uunan dooneynin ama uu awoodo inuu go'aan ka gaadho talaalka, talaalka koronaha siintiisa waxaa mar walba loo baahan yahay ogolaanshaha labada waalid.

Foomka ogolaanshaha talaal bixinta awgeed ee magaaladda Turku waxaad ka heleysaa cinwaankan:

turku.fi/12-15-vuotiaiden-koronarokotukset (Foomka oo af-finnish ah)

Maxaa loo baahan yahay in fiiro loo yeesho markaad goobta talaalka imanaysid?

- Imow adiga oo aanan calaamadah koronaha qabin
- Ku dhaqan masaafadda kala fogaanshaha iyo nadaafada gacmaha oo wanaagsan
- Isticmaal af iyo san daboolka
- Soo qaado foomka ogolaanshaha ee ay waalidku soo saxeeleen
- Soo qaado kaadhkaaga- Kelada
- Soo gasho funaanad/ garan aad si fudud isaga bixin kartid marka lagu talaalayo
- Talaalka ka dib waa inaad ku soo talogashid inaad goobta talaalka sii joogeysid muddo ilaa 15 daqiiqo ah